# Qoysas Hormar Samaynaaya

## Sida Best Starts u cabirto farxada



Taageerada ilmaha inta u dhaxaysa dhalashada ilaa qaangaarnimada waxya u baahan tahay taageero aan kala go' lahayn oo lagaga jawaabayo baahiyaha aas aasiga ah iyo bulsho. Taageerooyinkan waxaa loo yaqaan xaaladaha ilaalinta badbaado daraasaduhuna waxay muujinayaan xaaladahan inay toos ula xidhiidhaan badqabka dhaama ee caruurta, qoysaska, iyo bulshooyinka.

### Xaaladaha badbaado ee aanu cabirno

**Adkaysiga qoyska:** Qoysasku waxay leeyihiin xirfado iyo xeelado ay ku wajahaan caqabadaha, mushkiladaha, iyo/ama jahwareerka.

**Taagereada qoyaska:** Qosasku waxay ka helaan taageero qoyska, asxaabta, dariska, iyo bulshada si ay u helaan baahiyahooda dareen.

**La socodka waalidnimada iyo korniinka ilmaha:** Qoysasku waxay leeyihiin filashooyin da'da ku haboon oo awoodaha caruurta ah oo waxay isticmaalaan farsamooyin daryeelka ilmaha oo joogto ah, oo wax ku ool ah.

**Taageerada la taaban karo:** Qoysasku waxay leeyihiin baahiyo aas aasi ah, adeegyo iyo khayraad ka caawiya inay la tabaalaan waxyaabaha warwarka leh

**Caruurta iyo caruurta sii yaryar way magoolaan:** Caruurta iyo caruurta sii yaryar waxay jecel yhaay inay wax ka ogaadaan barashada, bandhigaan adkaysi, la macaamilaan daryeelayaashooda, oo waxay ruuxa ayay jecel yihiin, jilicsan yihiin, dhoola cadeeyaan oo way qoslaan badanaa.

Xaalada badababado waxaa weeye agab wax ku ool ah oo lagu xoojiyo fahanka halka aanu ka siin karno taageero dheeraad ah qoysaska.

## Wax ka oggow Xog Uruurinta Best Starts ee Caafimaadka Caruurta

Xogta xaaladaha badbaadada qoysaska Degmada King waxay ka timaadaa Xog Uruurinta Best Starts ee Caafimaadka Caruurta, xog uruurinta qoysaska Degmada King ee caruurta ku jira dugsiga hoose ama ka yar.

Barashada #1: Xaalado badan oo badbaado oo caruurta iyo caruurta sii yaryar marka ay haystaan, waxaa sii kordhaya ka warbixintooda caafimaadka dhaama.

**77%** qoysaska leh hal xaalad oo badbaado waxay sheegeen caafimaad wanaagsan ama aad u wanaagsan oo caruurtooda ah

**94%** qoysaska leh hal xaalad oo badbaado waxay sheegeen caafimaad aad wanaagsan ama aad iyo aad u wanaagsan oo caruurtooda ah

King County
Best Starts for KIDS

Mudnaan siinta siyaasahada iyo barnaamijyada lagu dhiso xaalada badbaadada qoyska ee lagu xoojiyo waxaa weeye maalgelin caafimaadka iyo badqabka bulshada ah.

> *Aqoon is waydaarsiga Ikhtiyraada Wanaagsan ee Hagitaanka ah waxa uu i baray sida loo sharaxo ee loo samaysto shuruucda qoyska ee muhiimka u ah caruurteena. Waxa aan bartay in aan in kasii badan u naxariisto caruurtayda, fahmo da'dooda, oo xaalada ay ku jiraan.*
>
> \- Ka qayb galka aqoon is waydaarsiga is kaashiga Isku Xidhka Qoyska Wanaagsan ee Best Starts

Barashada #2: Qoysaska Degmada King waxay leeyihiin adkaysi oo qaar badan oo kamid ah waxay taageero la taaban karo ayay helaan, laakiin waxa jira meel u banaan korniinka si loo xaqiijiyo in dadka dhalinyarta ahi ay magoolaan oo qoysaskooduna helaan taageerada bulsho ee wanaagsan.

**Sawirka 1: Xadiga qoysaska Degmada King ee mid kastaaba leeyahay xaalada badbaado**

| | |
|---|---|
| Adkaysiga qoyska | 86% |
| Taageerada la taaban karo | 60% |
| Qiraalka hormarka waalidnimada iyo ilmaha | 48% |
| Magoolka caruurta iyo caruurta sii yaryar | 43% |
| Taageerooyinka bulshada | 36% |

Sawirka 1: Badnaa, 86% waalidiinta/daryeelahaaya Degmada King waxay leeyihiin xirfadaha iyo khdiadaha ay kaga gudbayaan marka ay la kulmaan caqabado, mushkilado, iyo jahwareer (oo lagu sheego adkaysiga qoyska). Laakiin 36% caruurta iyo caruurta sii yaryar ee Degmada King ee la nool qoysaska waxay sheegeen inay leeyihiin taageero bulsho oo ay ka helaan qoyska, asxaabta, iyo dariska oo ka caawisa baahiyahooda dareen. Inkasta oo 60% caruurta la egan qoyska ee baahiyahooda aas aasiga ah iyo adeegyada heli kara, kaliya 43% caruurta Degmada King ayaa magoola, oo keentey in xidhiidh adag oo ka dhaxeeyo qoyska, dareen ahaan adkaysi helaan, oo ay doonayaan inay ogaadaan oo ku faraxsan wax ka ogaanshaha, sida ay sheegeen waalidkooda ama daryeelayaashoodu. Inkasta oo, ku dhawaan kala badh qoysaska ay sheegeen inay yihiin hormarka waalidka iyo ilmaha oo joogto ah, filashooyinka da'da ku haboon.

Barashada #3: Khibrada qoysasku way kala duwan yihiin helitaanka xaalada badbaado ee qoomiyada/isirka, dakhliga qoyska, deegaanka, da'da caruurta, iyo da'da waalidka/koriyaha. rabitaanka jinsiga, iyo heerka waxbarashada.

Caadiyan, Qoysaska Degmada King waxay leeyihiin 5 xaaladood ee badbaadoba 2.7. Laakiin xaaladahan badbaado ayay ku kala duwan yihiin qoysaska Degmada King, kuwaas oo muujinaya inayna dadka meelaha kala kasoo kala jeeda ayna lahayn wax u gaar ah.

Marka la is barbar dhigo degmada caadiga ah, **qoysaska waxay sheegeen inay** leeyihiin xaalado badbaado oo dheeraad ah hadii ay:

- yihiin Hindida Maraykanka ama Cadaan
- ay soo gasho sanadkii wax ka badan $150,000
- ay degan yihiin deegaan Seattle ah
- ay leeyihiin caruur ka yar 5 jir
- ay waxbarsho sare leeyihiin

**Qoysaska ayaa sheegey inay leeyihiin xaalado** badbaado oo yar marka loo eego xadiga degmada hadii ay:

- yihiin Meksikaanka Maraykanka
- ay soo gasho wax ka yar $75,000 sanadkii
- ay degan yihiin deegaanka degnada Koonfur
- ay caruur ugu jirto dugsiga hoose
- waalidka/daryeelayaasha ka yar 30 jirka, dhamaystay dugsiga sare/GED ama ka yar, ama ah LGBQ+




Eeg shaashada Xog Uruurinta Caafimaadka Caruurta ee Best Starts si aad wax badan uga ogaato xaalada badbaado oo loo jejebiyay deegaan iyo aag.